# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Wiilkii Wixiisii Khasaariyey



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Ciise wuxuu jeclaa inuu dadak u shego waxyaalaha ku saabsan cafinta Ilaah. Laakiin hoggaamiyayaasha Yuhuuddu waxay ka cawdeen saaxiibtinimadiisa dembiilayaasha. Sidaa darteed Ciise wuxuu u sheegay saddex sheeko si uu u muujiyo in Ilaah ku faraxsan yahay marka dembiilayaashu ka qoomameeyaan dembiyadooda.



Sheekada ugu horreysa waxay ku saabsan tahay Nin haystay boqol neef oo ido ah.  Mid baa ka lumay/halowday. Isla kolkiba si toos ah ayuu aadhijirihii sagaal iyo sagaashankii cidlada uga tagay oo tii luntay ka daba tagay.





Adhijirihii wuu raadiyey oo raadiyey ilaa uu ka soo helo. Deedna garbihiis ayuu ku soo saartay oo u soo qaaday xaafaddii isaga oo aad u faraxsan.

Saaxiibadii buu ku yidhi, "Ila Farxa, inaan soo helay neefkaygii idaha ahaa ee iga lumay!"

Ciise wuxuu ugu sharxay in ay farxad weyn janada kaga jiri doonto dembiilayaasha toobad keena. Toobad keenidda micnaheeda waxa weeyaan in laga xumaado demiyadeenna – wey ku filan tahay ka xumaasha ka dhan aamusnaan!





Ciise sheekadiisa ku xigta waxa weeye oo ay ku saabsan tahay qof dumar (Naag) ah oo haysaatay toban lacag sanuud ah, laga yaabee inay ahayd inay nolsheedii oo idil ay urusanaysay intaa yar.

Wax aan fiicnayn baa qabsaday oo.  Waxaa ka luntay senti ka md ahaa sunuuddii.

Wey Xaaqday!  Oo Xaaqday! Oo Xaaqday aqalkeedii naagtii meel walba ayaya ka baartay.  Ugu dambayntii lacagtii ka luntay wey heshay.  Aad by u farxday. Maad qiyaasi kartaa waxa ay samaysay? Haa, waxay u sheegtay dhammaan saaxiibadeedii oo idil!





Mar labaad Ciise
wuxuu yidhi,
“Sidaa oo kale
maerkii mid dembi
leh toobad keeno,
farxad ayaa kaga
jirta Malaa’igaha
hortooda.”

Sheekada sadexaad ee uu Ciise sheegayna waxay tahay tii ugu murugada badnayd. Wuxuuna ka hadlay wiil isaga gurigii Aabbihii.



Dal fog buuna ku kharash gareeyey lacagtiiisi oo idil si nacasnima ah.  Iminka muxuu samayn karaa? Waxay ku samaysay wax laga naxo, macluul, wiilii gaajuu la dhiman karaa.



Baahi aad u daran, wiilkii shaqo ayuu ka helay xero doofaarada lagu quudiyo. Wuxuuna ku farxsanaa inuu cuno raashinka doofaarada. Laga yaabee inuu sidaa sameeyey! Ugu dambayntii, wiilkii caqligiisii baa soo noqday. "Ku noqo gurigiinii, xitaa shaqaalahaa cunta wanaagsan bay cunaan," ayuu ku fikiray ama is yidhi.





“Gurigii baan aadayaa oo sheegayaa Aabbahay inaan ka xumahay dembiyadeedii. Ma istaahili inaan wiilkaaga noqdo hadda ka dib. Waxaan rajaynayaa inuu i shaqaalaysiin doono shaqaaale ahaan.”

Intii uu weli meel fog oo ka duruksan gurigii Aabbihii soo socday, AAbbihii baa arkay inuu soo socdo, AAbbihii baa ku soo orday wiilkiisii soo noqonaya. Wuu dhunkaday oo laabta saaaray isagii.





"Aabbe waan kuugu gafay. Ma istaahilo inaan wiilkaagii noqdo." Wiilkii AAbihii wuxuu weyddistay inuu u kireysto shaqaale ahaan. Aabihii baa ka dhex galay.

"U keena khamiiska ugu fiican, kabo iyo kaatun wiilkayga. Oo u diyari xaflad weyn."

Waxaa dhacday xaflad lala yaabay sababtoo ah wiilkii lumay baa la helay. Ciise ayaa sheekadan sheegay sababta oo ah waxay tusuneysay sida Ilaah u jecel yahay inuu aqbalo dembiilayaasha u toobad keeno Isaga.



Wiilkii Wixiisii Khasaariyey

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Luukos 15

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

# Dhammaad

45

60

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16